Marka aad lahayd wareysiga hore ee isdhiibitaanka waxaa IND ku siiyeen qoraal ku saabsan soo diritaanka dokumentiga. Ma heleysaa wareysiga hore ee isdhiibitaanka ka dib dokumentiyo muhiim u ah codsigaaga magangelyada? Qoraalka waxaa ku qoran sida aad IND ku siin karto.

Ma leedahay dhibaatooyin jir ahaan ama maskax ahaan oo muhiim ma tahay in IND ay taasi ogaato? Markaa taasi sida ugu dhaqsaha badan ugu sheeg IND. Waxaa IND isku deyeysaa iney sida ugu wanaagsan iney kaaga taageeraan. Sidaa ayaa dacwadaada magangelyodoonka kuugu socon karaa.

## Diyaarinta dacwadaada magangelyodoonka?

Ma jirtaa 15 ilaa 18 jir? Waxaa marka aad is dhiibto ka dib COA abaabuleysaa xero gaar ah oo da'yarka oo aad degeyso. Ma ka yar tahay da'daada 15 jir? Markaa Nidos ayaa kuu abaabuleysa cid dhalinta heysa oo aad la degeyso.

Marka La dhaafo marxalada is dhiibitaanka ka dib waxaa bilaabinaaya Mudada nasashada- iyo is diyaarinta (RVT). Waxaa mudada RVT aad mareysaa baaritaan caafimaad si loo xadido in aad sababahaaga magangelyada aad sheegan karto. Mudada RVT waxaad kaloo warbixin ka heleysaa dacwada magangelyodoonka Ururka qaxootiga caawiya (VWN). Waxaanu bixinaa macluumaadka nidaamka magangelyodoonka iyo waxaanan ku caawin karnaa inta lagu jiro nidaamka magangelyodoonka. Caawinaadani waa lacag la'aan. Wax yar ka hr inta uusan bilaaban dacwadaada magangelyo waxaad isbaraneysaan garyaqaankaaga. Garyaqaankaaga wuxuu yaqaanaa sharciyada iyo nidaamka magangelyada. Wuxuu kaloo kaa caawini doonaa diyaarinta wareysiga dambe. Tani waa wadahadalka aad IND la leedahay ee aad ugu sheegeyso sababta aad magangelyo u weydiisaneyso. Caawinaada garyaqaanka waa lacag la'aan.

## Dacwada magangelyodoonka maalin ilaa maalin

Maalinta aad ballanta la leedahay IND waxaad aadeysaa xafiiska IND oo waxaa bilaabanaaya Dacwada Guud ee Magangelyada (AA). Wuxuu AA badiyaa socdaa 6 beri. Waxaa kaloo jira Dacwada Guud ee Magangelyada oo dheer: waa AA+ kaasoo badiyaa socda 9 beri. Waxaa AA+ waxaa loogu talo galay codsiyada magangelyada ee IND u maleyneyso inuu wareysiga dambe uu dheer yahay ama baaritaan dheeraad loo baahan yahay. Iyo magangelyodoonka u baahan fiiro dheeraad xagga maskax ahaan ama dhibaato jir ahaan qaba. RTV ka dib waxaa IND go'aamineysaa haddii aad AA ama AA+ aad aadeyso. Hoos ayaa ka aqrineysaa sida euu dacwadaada magangelyada maalin ilaa maalin sida uu u soconaayo.

*Dacwada Guud ee magangalyodoonka (AA)*

• Maalinta 8 iyo 9: go'aanka labaad.

## Dib uga noqashada codsigaaga

Waa kuu banaan tahay inaad codsigaaga mar walba oo aad jeceshahay ka soo noqoto. Hadey xaalada sidaa tahay waxaa fiican inaad la xariirto garyaqaanka, caawiyaha dhalinta NIDOS ama IND. Ma ka soo noqoneysaa codsigaaga ee IND? Markaa Nederlaan ma sii joogi kartid. Ilaa haddii aad sabab kale laguugu ogol yahay inaad ku joogto. Ma ka soo noqoneysaa codsigaaga magangelyo iyo mana laguu oggola inaad sabab kale Nederlaan ku joogto? Markaa waa inaad wadankaaga ku noqotaa. Waxaad joogeysaa xero ilaa uu ka bilaabanaayo safarkaaga dib u noqosho. Marka aad ka soo noqoto codsigaaga magangelyo weli waa suura gal inaad mar kale magangelyo weydiisato.

## Dacwada magangalyodoonka ka dib

**Waxaad heshay sharci deganaansho**
IND ma go'aamisay inuu codsigaaga magangelyo la ogolaaday, markaa (ilaa muddo) waad ku noolaan kartaa Nederlaan. Waxaa lagu siinayaa sharci deganaansho. Nidos ayaa guri kuu raadineysa oo ah meel dad yar degan yihiin haddii aad 15 jir ama ka weyn tahay. Waxaa IND ku sheegeysaa xaquuqdaada iyo waajibaadkaaga ka dib markaad sharciga deganaansho hesho. Caawiyaha dhalinta ee NIDOS iyo shaqaalaha VWN ayaa ku caawin kara si aad u hesho jidkaaga iyo ururada jira.
Iyo waxey kaa hagi karaan u guuritaanka degmada iyo helitaanka waxbarasho ama shaqo. Caawiyaha dhalinta waxaa kaloo ay kaa caawin kartaa mideynta reerka.

**Ma helin sharci deganaansho magangelyo**
Ma soo diiday IND codsigaaga magangelyodoonka? Markaa IND waa iney go'aamiyaan haddii uu jiro meel kugu habboon oo aad degto wadankaaga. Tusaale ahaan waalidkaaga, reerka intooda kale ama xero dejinta ah. Ma jiraa meel haboon oo lagu geeyaa markaa waxey IND go'aamineysaa inaad wadankaaga ku noqoto. Ma weli waxaan jirin wax waadix ah oo meesha lagugu heyn doono haddii IND go'aamiso inaadan magangelyo heleynin? Markaa waxey IND weydiineysaa Waaxda Dib u nOqoshada iyo Bixitaanka (DT&V) iney baaritaan sameeyaan meel kugu habboon oo aad degto. Adiga waxaa lagaa rabaa inaad si wanaagsan ula shaqeyso baaritaankan. Baaritaanka wuxuu soconayaa ugu badnaa 1 sano. Ilaa uu baaritaanka socdo, Nederlaan waad joogi kartaa. Waxaad degan tahay da'yar ahaan guri ay dad yar degan yihiin ama reer ku haaya.

Haddii ay cadaato inaan meel kugu habboon oo aad degto jirin, waxey DT&V u sheegayaan IND. Ka dibna waxaad heli kartaa sharciga iyadoo aan qofka qaladkiisa ahayn ee da'yarka, keliga ah ee magangelyodoonka ee IND. Taasi waxaa sharuud u ah inaad weli si fiican ula shaqeysey baaritaanka. Haddii aadan si fiican ula shaqeyn waxaa IND muddo dheeraad ah ay siin kartaa DT&V si loo baaro yaa ku daryeeli karo wadankaaga. Ma aadan la shaqeyn iyo uma suura gelin dowlada Nederlaan iney kugu celiyaan wadankaaga? Markaa waxaad daryeel heleysaa ilaa 18aad. Markaa sharci

